Somali Levy translation

Cashuurta ka shaqeysa ama hawlaha cashuurta ee Iskuulada Dadweynaha Faribault.

Horay u codee ama codee 5ta bisha Nofeembar. Codeeyayaasha horey way u codeen karaan iyada oo loo marayo codbixinta maqnaanshaha.

Kullanki 22-ka bisha Luulyo, 2019, guddiga iskuulka Faribault wuxuu si wada jir ah ugu codeeyay inay fasaxaan doorashada khaaska ah ee maalinta Tallaada 5ta bisha si ay bulshada ugu codeeyaan laba su'aalood oo codbixinta loogu talagalay cashuurta ku shaqeysiga, Su'aalaha cashuurta shaqeynta waxay doonayaan inay kordhiyaan maamulka dakhliga degmada ee in la bixiyo lacagaha hawlgalka ee loo baahan yahay si loo abuuro jadwal toddobo ah oo Dugsiga Sare ee Faribault, iyo in la bixiyo taageero dheerad ah ee ardayda iyo gaadiid.

MAXAY TAHAY SABABTA AAN U DALBANAY CANSHUUR? Gobolka Minnesota ma buuxiyo waajibaadkiisii ahaa in lagu maalgeliyo iskuulada dadweynaha iyo lacag la'aantu waxay saameyn ku leedahay go'aannada miisaaniyadeed ee degmo dugsiyeeddeena. Degmadeena waxay sameysay $ 1.9 milyan oo isku hagaajin miisaaniyadeed sanad dugsiyeedka 2019 - 20. Waxaan codsaneynaa canshuurta si aan u wada siino dhamaan ardayda fursad weyn oo ay ku guuleysan karaan oo aan ku helaan dariiqo heer sare ah. Ama ha ahaadaan kuwa ku soo galaya xoogagga shaqada ama sii wadanayaan waxbarashadooda. Jadwal toddobo ah ayaa ardaydeena gelin doona in ay dhamaan la sinaadaan ardayda gobolka.

WARQADDA WARBIXINTA
SU'AASHA 1AAD: **Ansixinta dakhliga dheraadka ah ee dugsiga Sare Toddobo Maalmood.** Ogolaanshaha waxay kordhin doontaa dakhliga guud ee waxbarashada $221 arday kasta. Oggolaanshaha dakhliga aftida ayaa soo kordheysa sannad kasta heerka sicir-bararka waxaana lagu dabaqi karaa 10 sano, laga bilaabo canshuurta la bixin doono 2020, in ka laabasho ama laga dhimayo sida sharcigu dhigayo.

ADIGOO CODEEYA "HAA" KU SAABSAN SU'AALAHA LA SOO BANDHIGAY WAXAAD CODEYNAYSAA IN LA KORDHIYO CANSHUURAHA GURYAHA

SU'AASHA 2AAD: Ansixinta Dakhliga Dheeraadka ah ee Taageerada Tacliinta Ardayga iyo Ansixinta Gaadiidka. Ogolaanshaha ayaa kordhin doonta dakhliga guud ee waxbarashada $115 ardaygiiba. Oggolaanshaha dakhliga aftida ayaa soo kordheysa sannad kasta sicir-bararka waxaana lagu dabaqi karaa 10 sano, laga bilaabo canshuurta la bixin doono 2020, in ka laabasho dhacdo ama laga dhimayo sida sharcigu dhigayo.

ADIGOO CODEEYA "HAA" KU SAABSAN SU'AALAHA LA SOO BANDHIGAY WAXAAD CODEYNAYSAA IN LA KORDHIYO CANSHUURAHA GURYAHA

HADDII CASHUURTU LAGU GUULEYSTO,
Mudnaanaha waxaa ka mid ah bixinta ardaydeena:

- Toddobo maalmood oo dugsi sare ah, kaasoo u oggolaan doona inay ka qeyb qaataan xulashooyinka takhasuska leh ee maadooyinka sida wax soo saarka, robotka, iyo injineerinka. Waxay sidoo kale yareyn doontaa baahida ardayda u baahan yihiin inay qaataan dugsiga xagaaga si loogu waafajiyo dhammaan fasallada ay jecel yihiin inta lagu jiro sannad dugsiyeedka.

- Helitaan badan oo fasalada hal abuurka ah oo qayb ka ah iyo jidadka ganacsiga, waxay bixiyaan dhibco kulleej, oo u oggolaadaan inay sahamiyaan meelaha xiisaha leh.

- Fursado dheeraad ah oo khibrad looga helo iyada oo la adeegsanayo goobo shaqo oo laga helo meheradaha maxalliga ah iyo waxbarashada kale ee ku saleysan bulshada.

- Caawinaad dheeri ah oo xagga tacliinta iyo caafimaadka maskaxda ah.

- Ikhtiyaarada gaadiidka dheeraadka ah.

LACAGTA CASHUURTA XAGGEEY AADEEYSA?

U-beddelidda toddobo-maalmood ayaa u baahan shaqaaleyn shaqaale dheeraad ah oo ku takhasusay baridda noocyada casharada hal-abuurka ah ee aan dooneynno inaan ku siino ardayda maadooyinka sida soo-saarka, robotics, injineernimada, iyo caafimaadka iyo adeegyada aadanaha. Fasaladaani sidoo kale waxay u baahan yihiin qalab u oggolaanaya ardayda inay ku helaan khibrad gacan-ka-qabasho ah. Shaqaale dheeraad ah ayaa sidoo kale looga baahan yahay inay hirgeliyaan barnaamijyada akadeemiyadeed ee kor u qaadaya waxqabadka ardayga. Lacagtu sidoo kale waxay u sii gudbi doontaa siinta saddex dariiq oo baska dheeriga ah oo bas u fuulaya ardayda dugsiga sare min labo mayl illaa hal mayl ah.

12ka iskuul oo isku kooxda ah ee la baxay magaca “Big 9 conference”, dugsiga sare ee Faribault keliya ayaa wali ku shaqeeya jadwalka mudada lixda ah.

SIDEE AAN U BARBAR DHIGNO DEGMOOYINKA KALE?
Canshuuraha hantida iskuulka ee Faribault ayaa 28 boqolkiiba ka hooseeya celceliska gobolka. Haddii labada su'aalood ee cashuurta la oggolaado, cashuurta hantida dugsiga ee Faribault waxay noqon doontaa 16 boqolkiiba ka hooseysa celceliska gobolka oo ka hooseeya kuwa Austin, Owatonna, Albert Lea iyo Northfield.

WAA MAXAY SAAMEYNTA CASHUURTA?
Celceliska ahaan qiimaha suuqa guryaha Faribault waa $ 175,000. Saameynta cashuurta guryaha waxay noqon doontaa sanadkiiba $99, ama in kabadan $8 bishii.

MAXAA DHACAYA HADDII CASHUURTU DHACDO AMA LAGU GUULEYSAN WAAYO?

- Dugsiga sare wuxuu sii wadayaa inuu ku shaqeynayo jadwalkii 6 maalmood taas oo xaddidaysa helidda kulliyadda ardayda ee koorsooyinka qaadashada kuleejka, xirfadaha iyo jidadka ganacsiga, xulashooyinka iyo jadwalka barashada ku saleysan bulshada ee lixda sano ah

- Tiradada shaqaalaha oo la yareeyo iyo tirada ardayda oo la kordhiyo fasalkiiba

- Ardayda waxay sii wadi doonaan inay qaataan xagaaga dugsiga ku habboon fasallada looga baahan yahay jadwalkooda

- Ardayda ayaa heli doonin kaalmo tacliimeed oo dheeri ah iyada oo loo sii marayo barnaamijyada akadeemiyadda.

- Ardayda xaafadooda ka fogtahay dugsiga sare ila 1-2 mayl ma heli doonan gaadiid

SIDA LOO CODEEYO Cod-bixiye kasta oo u qalma oo ku nool degmo dugsiyeedka wuxuu ka codeyn karaa goobta cod-bixinta ee isku dhafka ah ee loo qoondeeyey deegaankooda. Codbixinta ayaa furmi doonta 7 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo. Talaadada, 5ta bisha Nofeembar. Cod bixiyaha waa in la diwaangaliyaa si uu u codeeyo si uu xaq ugu yeesho inuu ka codeeyo doorashadan. Diiwaangelin shaqsi oo aan diiwaan gashanayn waxay iska diwaan gelin karaan goobta doorashada maalinta doorashada. 4H Dhiska Nambarka 17, 1900 Fairgrounds Drive Washington Center, 117 Shumway Avenue Buckham Community Center, 15 Division Street West Our Savior's Lutheran church, 1207 Prairie Avenue

Codbixiyeyaasha degmada 656 waxay codsan karaan codbixinta maqnaashada iyagoo la xiriiraya xafiiska kormeeraha guud ee Dugsiyada Dadweynaha ee Faribault 507-333-6010. Codbixiyeyaashu sidoo kale waxay codsan karaan warqadda ka maqnaanshada shaqsi ahaan xafiiska degmada Faribault iskuulada degmada, 710 17 Street SW, Faribault, MN 55021, ama qoraal ku soo aadi cinwaankaas.

Codbixiyeyaasha maqnaan doono sidoo kale waxay codkooda ka dhiiban karaan xafiiska dugsiga dadweynaha ee Faribault, 710 17th SW, Faribault, MN 55021, laga bilaabo Sebtember 20 ilaa Noofambar 1, 2019, laga bilaabo 7:30 am ilaa 4 pm, Isniinta ilaa Jimcaha . Waxaan sidoo kale u furnaan doonaa codeynta maqnaanshaha maalinta 4ta bisha Nofeembar laga bilaabo 7:30 a.m. illaa 5 p.m. Codsiyada lagu helo codbixinta maqnaanshaha waxaa laga heli karaa websaydhka Faribault.k12.mn.us